# Waraaqda Xogta Ku saabsan Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiyada Xorta ah

Maanta waxaad shaacinaysaa ku dhaqanka Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiga Xorta ah ee Jamhuuriyada Federaalka ah ee Jarmalka Kani waa shardi hordhac u ah codsashada xaqa fursada daganaanshaha (ogolaanshaha daganaanshaha ee ku cad qaybta 104c, farqada 1, jumlada 1, lambar 1, ee sharciga Aufenthaltsgesetz [AufenthG – Sharciga Daganaanshaha, Shaqada Dhaqaalaha iyo Daganaanshaha Dadka shisheeyaha ah ee Sharciga Daganaanshaha Dhulka Federaalka]). Xaqa fursada daganaanshaha ayaa ku siinaaya fursad aad ku buuxiso shuruudaha ogolaanshaha daganaanshaha rasmiga ah, ee sharciga ah ee Jarmalka.

Si aad awood ugu yeelato inaad hesho xaqa daganaanshaha, waa inaad barataa mabaadii'da dadka Jarmalku ku wada nool yihiin. Waayo waxaa sidoo kale lagaa doonayaa inaad ku dhaqanto mabaadii'daas. Isla waqtigaas, waxaad keliya awoodi doontaa inaad ka faa'iideysato faa'iidooyinka aad helayso maalin kasta haddii aad fahanto mabaadii'daan.

Fikirka Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiyada Xorta ah ee aad aqbalayso inaad ku dhaqanto maanta ayaa qeexaaya guud ahaan mabaadii'daan. Mabaadii'da ayaa ku cad Sharciga Guud, kaaso loo yaqaano Dastuurta Jamhuuriyada Federalka ah ee Jarmalka.

Si gaar ah, waa inaad fahantaa qodobada soo socda aadna si shuruud la'aan ah u aqbashaa uguna dhaqantaa Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiyada Xorta ah:

Jarmalku waa dal ku dhisan nidaamka baarlamaaniga ah. Dadka ayaa ku doorta wakiilladooda waraaqda codbixinta guud, tooska ah, xorta ah, loo siman yahay ee qarsoodiga ah. Ma jiro qof xaq u leh inuu codeeyo oo laga hor istaagi karo inuu codkiisa dhiibto. Cod kasta xaq buu leeyahay dhammaan codadkuna waa isku awood. Qofna laguma cadaadin karo inuu fikirkiisa badelo marka uu codkiisa dhibanaayo. Ma jiro qof kale oo xaq u leh inuu ogaado cida uu qof kale u codeeyay.

Wadanka Jarmalka, xisbiyo badan oo siyaasadeed ayaa la ogol yahay, kuwaasoo kala matali kara masaalix iyo mabaadii' kaladuwan. Dhammaan xisbiyadu waxay haystaan fursado siman si ay u ololeeyaan ayna ugu soo istaagaan doorashada si ay u dhaqan gashaan mabaadii'dooda siyaasadeed. Xisbiyadu waa inay ku dhaqmaan qodobada Sharciga Guud marka ay dejinayaa higsiyadooda iyo wadooyinka ay u marayaan gaarista higsiyadaas.

Bundestag ayaa wakiil ka ah dadwaynaha (baarlamaanka) waana laanta ugu saraysa dawlada. Markay ay codeeyaan, codadka ugu badan ayaa go'aaminaaya cida noqonaysa Hogaamiyaha Dawlada Federaalka ah. Dawlada Federaalka ayaa fulisa shaqooyinka siyaasada waxaana maamulaaya Bundestag. Xisbiyada aan qaybta ka ahayn dawlada ayaa door muhiim ah ku leh maamulka dawlada ayagoo noqonaaya xubnaha mucaaridka ah ee Baarlamaanka. Dawlada waxaa xilka looga qaadi karaa baarlamaanka iyo doorashooyinka, kadibna waxaa si nabadgalyo ah loogu badelaa dawlad kale.

Jarmalku waa dal ku shaqeeya dastuurka. Bundestag ayaa ansixiya sharciyada quseeya dhammaan Jarmalka. Mararka qaar, talaabadaan ayaa u baahan ogolaanshaha dawlad gobaleedyada federaalka. Sharciyadu waa inay markasta waafaqsan yihiin Dastuurka Dalka. Si taas lamid ah, dhammaan xukunnada iyo go'aannada maxkamadaha Jarmalka waa inay waafaqsan yihiin Dastuurka Dalka. Waxaa talaabadaan xaqiijisa Maxkamada Sare ee Dastuuriga ah ee Federaalka oo ah maxkamada ugu saraysa dalka Jarmalka. Dhammaan maxkamadaha

Jarmalku waxay raacayaan sharciga. Hase yeeshee, maxkamadaha ayaa sida kale ah kuwo madax banaan waana inaysan soo faragelin dawladu ama maamulladada kale go'aannada maxkamadaha. Qof kasta wuxuu xuquuq siman ku leeyahay maxkamada, ayadoo aan loo eegayn shaqsiyada, xaalada dhaqaale ama darajada uu ka joogo bulshada dhexdeeda.

Shaqooyinka maamulka ee maalinlaha ah waxaa fuliya maamullada gobaleedka iyo maamulka magaallada. Maamulladu waxey sidoo kale ku dhaqmayaan sharciga waxeyna keliya ku shaqayn karaan sida sharcigu qabo. Sharciyada ayaa qabanaaya dhammaan dadka si siman. Qof kasta oo lagu qaado talaabo maamul ayaa codsan kara in talaabadaas ay dib u eegis ku samayso maxkamadi.

Wadanka Jarmalka, ma jiro qof loo ogol yahay inuu ku takri-falo dawlada ama dadka asagoo adeegsanaaya xoog. Talaabooyinka xooga loo adeegsado waxaa keliya qaadi kara hay'adaha dawlada sida booliiska waxaan keliya la adeegsan karaa marka xal kale uusan jirin. Hase yeeshee, talaabadaan waxaa keliya loo fulin karaa sida sharcigu qabo. Talaabo kasta waxaa dib u eegis ku samayn kara maxkamada oo xataa waa la mamnuuci karaa.

Wadanka Jarmalka, xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha ayay ilaalisaa ayna difaacdaa dawladu. Xuquuqda aadanaha ee uu damaanad qaadaayo Dastuurka Dalku waa lama taabtaan, si gaar ahna sharafta aadanaha iyo xaqa qofku u leeyahay noloshiisa iyo sharaftiisa.

Isla sidaas ayaa loo ilaalinayaa hormarinta xorta ah ee shaqsiyada, taasoo ka dhigan in qof kasta uu gaaro go'aanadiisa iyo talaabooyinkiisa si madax banaan. Hase yeeshee, xuquuqda dadka kale waa inaan lagu tuman waana inaan la jebin sharciyada. Dhammaan dadka ku dhaqan Jarmalka ayaa loo ogol yahay inay fikirkooda u cabiraan si xor ah, laakiin lama ogola inay kiciyaan nacayb ama rabshad ka dhan ah dadka ka fikir duwan iyaga. Banaan-baxyada iyo mudaaharaadada dadwaynaha ayaa la ogol yahay, laakiin waa in loo sameeyaa si nabdoon.

Dastuurka Dalka ayaa sidoo kale damaanad qaadaaya sinaanta dhammaan dadka. Qofna lama takoori karo, xukumi karo ama lama wiiqi karo sinaba, hadday tahay sabab la xiriirta asalkiisa, diintiisa, naafada ama caqiidada intaba. Fal kasta oo abuuraaya Nacaybka Yuhuuda, isir nacayb, nacaybka dadka wadamada kale ama falalka kale ee kasoo horjeeda banii'aadanimada waa sharci daro waxayna lidi ku yihiin balanqaadkaan.

Rag iyo dumar-ba waa la siman yahay. Dumarka, ragga iyo dadka isku aqoonsan jinsi nooc kale ah ayaa dhammaan helaaya xuquuq siman. Qofna loolama dhaqmi karo si xun, xukumi karo ama khatar looma gelin karo sinaba sabab la xiriirta jinsigiisa ama dookhiisa galmada. Dadka qaab nololeedkoodu ka duwan yahay fikirka qofku aaminsan yahay waa in sidaas awgeed lagu qadariyaa loona dulqaataa.

Aqoon kale oo muhiim ah oo ku saabsan nidaamka sharciga, laakiin sidoo kale ku saabsan dhaqanka iyo taariikhda Jarmalka, ayaa lagugu siin doonaa koorsada tababarka. Koorsada tababarku waa qayb kamid ah koorsada isdhexgalka bulshada. Marka lagu siiyo fursada xaqa daganaanshaha, waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybgasho koorsada isdhexgalka ama waxaa qasab kugu noqon doonta inaad ka qaybgasho.

Xog badan ka ogoow nolosha Jarmalka si iskaa ah adoo ka helaaya xog ilaha la isku halayn karo, sida barta Dawlada Federaalka ah [https://www.make-it-in-germany.com/de/leben-in-deutschland/deutschland-kennenlernen/deutsche-gesellschaft](https://www.make-it-in-germany.com/de/leben-in-deutschland/deutschland-kennenlernen/deutsche-gesellschaft), Xafiiska Federaalka ee Soo

galootiga iyo Qaxootiyaasha https://www.bamf.de/DE/Themen/Integration/ZugewanderteTeilnehmende/ErsteOrientierung/UnserGrundgesetz/unser-grundgesetz-node.html ama Wakaalada Federaalka ee Waxbarashada Dadwaynaha https://www.bpb.de.